KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

نشـــرة رســـمية لجمهـــورية الصومـــال الديمقـــراطيـــة

Sannadka 3aad — Muqdisho, 28 Febberayo 1975 — L. 4 R. 2

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudaheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay waxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 18 Tr. 25-8-1974 — *La wareegidda iibka iyo qeybinta Galleyda iyo Massaggada.* — Bog. 153

LEGGE L. 19 Tr. 9-2-1975 — *Approvazione della Convenzione tra il Governo della Repubblica Democratica Somala e l'Alitalia.* — » 154

SHARCI L. 19 Tr. 9-2-1975 — *Oggolaasho Heeshiis dhexmaray Dawladda Soomaaliyeed iyo l'Alitalia.* — » 160

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 21-1-1975, L. 28 — *Magacaabid Gud-Guddoomiye Gobolka Hiiraan.* — « 16 .

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 21-1-1975, L. 29 — *Magacaabid Guddoomiyaha Gobolka Togdheer.* — « 163

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA Tr. 21-1-1975, L. 30 — *Gaashaanle Dhexe Cabdalla Xaaji Axmed ee ka tirsan C. Booliska la dallacsiiyey lana gaarsiiyey darajiada ah Gaashaanle Sare.* Bog. 163

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Agosto 1974, L. 31 — *Siismo dhul Dawladeed la siiyey Jaalle Sheekh Xasan Hamuud Cabdi.* « 165

WASAARADDA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA Tr. 1 Febberayo 1975, L. 32 — *Xabsi Cusub.* « 166

---

# BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Tr. 1 Febberayo 1975 — *Dhumd Jegga wareega L. 12007, Sh. So. 2.300 uu leyahay Xasan Caydiid Warsame. (21)* » 167

MAXKAMADDA GOBOLKA HIRAN Tr. 1 Febberayo 1975 — *Buugga lacagta L. 14466, Sh. So. 800 uu leyahay Aadan Cabdi Jabiin. (22)* » 167

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA Tr. 11 Febberaayo 1975 — *Jeegga Wareega L. 12093 So. Sh. 4.000 ledahay Busad Axmed Muxumed. (23)* » 168

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Tr. 23 Febberayo 1975 — *Jeegga Wareega L. 11997, So. Sh. 2.000 leyahay Axmed Yuusuf Faarax. (24)* » 168

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR Tr. 1 Maarso 1975 — *Buugga Lacagta L. 1307 So. Sh. 701,85 uu leyahay Saalax Cabdalla Mubaarak. (25)* » 169

MAXKAAMADDA GOBOLKA BANAADIR Tr. 2 Marso 1975 — *Jeegga Wareega L. 003404 ee uu leeyahay Cali Haybe Waceys. (26)* » 169

# BOGGA KOWAAD

## S H A R C I

SHARCIGA L. 18 Tr. 25 Agosto 1974.

Wax ka beddelid qodobka 5aad ee Sharciga L. 51 ee soo baxay 22kii Luliyo 1971 kuna saabsan la wareegidda iibka iyo qeybinta Galleyda iyo Massaggada.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINARA Go'aannadii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayaasha fadhigoodi 28kii Agosto 1974;

WUXUU SOO SAARARA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qodobka 6aad xubintiisa (i) ee Sharciga 51 ee soo baxay 22kii Luliyo 1971; waxaa lagu darayaa:

«Lama oggola in la bixiyo rukhsad in si ganacsi ah, galley, Massago, Saliid, suuf iwm., ee kale oo ay Dowladdu kula wareegtay sharciga kor ku xusan, Gobol ama Degmo inta laga qaado ama Degmo kale loo iib geeyo».

Qod. 2aad

Qodobka 6aad Xubintiisa (2aad) ee sharciga kor ku xusan waxaa lagu beddelay xubinta (2) iyo xubnaha dheeraadka ah (3), iyo (4) ee soo socda:

(2) — Beeraaleyda yar yar waa in loo oggolaadaa, marka laga gadanaayo wixii ay beerteen in guryahooda loogu reebo cunto ugu filan hal fasal iyaga iyo xaaskooda;

(3) — Cuntada hal fasal loogu tala galayo ninka beeralayda ah iyo xaaskiisa waa in lagu caddeeyaa amar qoran oo ka soo baxay Wakaaladda Horumarinta Beeraha iyadoo lala tashaday Wasaaradda Beeraha;

(4) — Haddii beeraaleyda yar yar fasal ka xumaado oo ay u baahdaan Galley ama massaggo amaah ah waa in Wakaaladda Horumarinta Beeruhu u oggolaata amaahdaa oo la siiyo.

Qod. 3aad

Qofkii u hoggaansami waaya qodobada sharcigan, waxaa lala tiigsanayaa sharciga lamb. 51 ee soo baxay 22kii Luuliyo 1971.

Qod. 4aad

Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka haddii loo baahdo, wuxuu soo saari doonaa xeer lagu hirgeliyo sharciga.

Qod. 5aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa 28kii Agosto 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 25 Agoosto 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**LEGGE L. 19 Tr. 9 Febberayo 1975.**

**Approvazione della Convenzione tra il Governo della Repubblica Democratica Somala e l'Alitalia.**

IL PRESIDENTE

DEL CONSIGLIO RIVOLUZIONARIO SUPREMO

VISTA la Prima Carta della Rivoluzione emessa in data 21 Ottobre 1969;

VISTA la Convenzione 15 Febbraio 1970, approvata con Decreto del Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo n. 37 del 21 febbraio 1970, stipulata fra il Governo Somalo e l'Alitalia per la partecipazione nella società Somali Airlines e pubblicata sul Bollettino Ufficiale della Repubblica Democratica Somala Suppl. n. 4 al n. 2 del 26 febbraio 1970;

RITENUTA l'opportunità che la collaborazione tra il Governo Somalo e l'Alitalia — Linee Aeree Italiane S.p.A. sia continuata per un periodo ulteriore nell'interesse della società Somali Airlines;

CONSIDERATO che la nuova Convenzione conclusa il 24 gennaio 1974 tra il Governo della Repubblica Democratica Somala e l'Alitalia corrisponde ai reali interessi del Paese;

SU PROPOSTA del Segretario di Stato ai Trasporti;

D E C R E T A

Art. 1

E' approvata e resa esecutiva con effetto retroattivo dalla data della sua stipulazione, la Convenzione 24 gennaio 1974, stipulata tra il Governo della Repubblica Democratica Somala da una parte e dall'Alitalia — Linee Aeree Italiane S.p.A. dall'altra, che costituisce quella precedente del 15 febbraio 1970 tra le stesse parti contraenti, approvata con Decreto del Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo n. 37 del 21 febbraio 1970.

Art. 2

La nuova Convenzione fa parte integrante del presente Decreto che sarà pubblicato sul Bollettino Ufficiale e sarà inserito nella Raccolta Ufficiale delle Leggi e Decreti della Repubblica Democratica Somala.

Mogadiscio, lì 9 Febbraio 1975.

IL PRESIDENTE
del Consiglio Rivoluzionario Supremo

*(Gen. Div. Mohamed Siad Barre)*

IL SEGRETARIO DI STATO
ai Trasporti

*(Mohamed Buraleh Ismail)*

# CONVENZIONE TRA IL GOVERNO DELLA REPUBBLICA DEMOCRATICA SOMALA E L'ALITALIA S.p.A. PER LA PARTECIPAZIONE DELLA SOCIETA'

## «SOMALI AIRLINES — S.p.A.»

La presente Convenzione viene conclusa il giorno 24 gennaio 1974 tra il Governo della Repubblica Democratica Somala e l'Alitalia — Linee Aeree Italiane — S.p.A. con sede in Roma, rappresentati rispettivamente dai Signori:

— Ten. Col. Musa Rabile Got, Segretario di Stato ai Trasporti della Repubblica Democratica Somala;

— Dr. Umberto Nordio, Amministratore Delegato dell'Alitalia — Linee Aeree Italiane S.p.A.

debitamente autorizzati.

CONSIDERATO

a) che il Governo somalo intende continuare ad avvalersi della collaborazione dell'Alitalia, nella Somali Airlines;

b) che il Governo somalo ha ritenuto di proporre all'Alitalia di addivenire alla stipula di una nuova Convenzione che sostituisca quella stipulata il 15 Febbraio 1970;

c) che l'Alitalia è disposta a continuare a fornire la propria collaborazione nella Somali Airlines e ad aderire alla richiesta del Governo somalo di stipulare una Convenzione su nuove basi.

Viene di comune accordo deciso quanto segue:

### Art. 1

La presente Convenzione sostituisce quella stipulata tra il Governo somalo e l'Alitalia il 15 febbraio 1970.

### Art. 2

Scopo della Società è di effettuare operazioni di trasporto aereo passeggeri, posta e merci.

In particolare la Società può:

a) — Acquistare, costruire, esercitare, e prendere in concessione aeroporti, aviorimesse, officine, edifici e manufatti di ogni genere, destinati al servizio della navigazione aerea;

b) — Effettuare operazioni di assistenza aeroportuale (Handling) e di provveditoria di bordo (Catering), sia per necessità proprie che per quelle di altre Compagnie;

c) — Organizzare ed esercitare tutti i servizi che direttamente o indirettamente fanno parte o sono connessi con gli scopi della Società;

d) — Assumere ed addestrare personale per l'esecuzione di tutti i servizi enumerati in questa Convenzione;

e) — Compiere tutte le operazioni ed esercitare tutte le attività economiche, industriali e finanziarie che direttamente o indirettamente possono concorrere al migliore e più efficiente funzionamento della Società.

Art. 3

La Società ha un capitale di Sh. So. 1.600.000 (un milione e seicentomila) suddiviso in 3.200 (tremiladuecento) azioni da Sh. So. 500 (cinquecento) ciascuna, sottoscritte come segue:

| | | |
|---|---|---|
| Governo somalo | 51 % | (cinquantuno per cento) |
| Alitalia | 49 % | (quarantanove per cento) |

La partecipazione azionaria è limitata al Governo somalo e all'Alitalia, salvo diversa decisione da prenderesi di comune accordo tra le Parti Contraenti.

Art. 4

In caso di aumento del capitale sociale, le nuove azioni dovranno, senza eccezione, essere sempre offerte in operazione allo stesso prezzo agli azionisti della Società, in proporzione al numero di azioni da ciascuno possedute.

Art. 5

La Società sarà amministrata da un Consiglio di Amministrazione composto da sei membri nominati come segue:

a) — Tre cittadini somali, designati dal Governo Somalo

b) — Tre cittadini italiani, designati dall'Alitalia.

Il Presidente sarà scelto tra i Consiglieri designati dal Governo Somalo ed il Vice Presidente tra i Consiglieri designati dalla Alitalia.

Il Collegio Sindacale sarà composto da due Sindaci effettivi e due Sindaci supplenti, designati pariteticamente dalle due Parti, e da un Presidente da scegliersi di comune accordo dalle Parti stesse.

Per la validità delle deliberazioni del Consiglio è necessario la presenza effettiva ed il voto favorevole di più della metà dei suoi componenti.

Per il funzionamento del Collegio Sindacale varranno le norme di legge.

Art. 6

Per la validità delle deliberazioni dell'Assemblea Ordinaria, sia in prima che in seconda convocazione, è necessario il voto favorevole di almeno la metà più uno del capitale sociale.

L'Assemblea Straordinaria, sia in prima che in seconda convocazione, delibera validamente con il voto favorevole di almeno tre quinti del capitale sociale, salvo in casi in cui la legge prescriva più elevate maggioranze.

Art. 7

Il Governo Somalo si impegna a concedere alla Società l'esclusiva dei diritti per tutti i servizi interni ed internazionali, sia di linea che a domanda (charter) di bandiera somala, ed a negoziare i diritti di traffico con Paesi esteri in modo da salvaguardare gli interessi della Società stessa.

Art. 8

Il Governo concede alla Società l'esenzione dal pagmento di qualsiasi dazio doganale, diritti, imposte e tributi sulla importazione di aerei, parti di ricambio in genere, materiali ed attrezzature destinate ai reparti tecnico ed operativo (di volo e di terra), nonchè sui carburanti e lubrificanti avio.

Garantisce inoltre:

a) l'uso gratuito dei radio collegamenti, radio aiuti di navigazione e dei servizi meteorologici, sia attualmente esistenti che di futuro impianto e funzionamento;

b) l'uso gratuito degli aeroporti e dei campi di fortuna esistenti nel Territorio somalo e che vi verranno costruiti in futuro;

c) il ricovero gratuito degli aeromobili, dei materiali di ricambio e di ogni e qualsiasi attrezzatura occorrente all'attività della Società negli aeroporti e nei campi sopra indicati;

d) l'uso gratuito, sempre negli aeroporti e nei campi sopra indicati, dei locali occorrenti alla Società per l'installazione di officine, uffici in genere, aerostazioni ecc.

Art. 9

La Direzione della Società è affidata a cittadini somali.

Art. 10

L'Alitalia si impegna a fornire su richiesta della Somali Airlines e secondo le proprie possibilità, esperti amministrativi, tecnici e commerciali contro rimborso da parte della stessa Somali Airlines delle sole spese vive che a tale titolo l'Alitalia dovrà sostenere.

Alle stesse condizioni l'Alitalia provvederà all'addestramento del personale somalo inviato eventualmente presso il Centro Addestramento di Fiumicino o presso altri suoi Uffici sociali.

Art. 11

Nell'eventualità di perdite di gestione, l'Alitalia ed il Governo Somalo parteciperanno alle stesse in proporzione alla loro partecipazione azionaria pari, per l'Alitalia, al 49% e, per il Governo Somalo, al 51%.

Qualora le perdite di gestione dovessero superare l'importo annuo di Lit. 816.000.000 (ottocentosedicimilioni) l'eccedenza di detto importo sarà sopportata per intero dal Governo Somalo.

Ove si abbiano profitti, essi saranno destinati all'aumento del capitale sociale.

Art. 12

Trascorsi due anni dalla data del 1° gennaio 1974, l'Alitalia avrà la facoltà di recedere dalla Società, previo preavviso di sei mesi. Il Governo Somalo garantisce pertanto all'Alitalia in tale eventualità il pagamento in contanti di una somma pari al valore attribuibile alle azioni in base alle attività risultanti dall'ultimo bilancio approvato, e comunque non inferiore al loro valore nominale.

A sua volta il Governo Somalo, trascorsi due anni dalla suddetta data del 1° gennaio 1974 e previo preavviso di sei mesi, avrà la facoltà di acquistare la partecipazione azionaria dell'Alitalia alle stesse condizioni sopra riportate.

Il Governo Somalo si impegna altresì a garantire il libero trasferimento in Italia dei pagamenti di capitale azionario o di altre somme che saranno dovute dalla Società o dal Governo Somalo all'Alitalia in conseguenza della esecuzione della presente Convenzione e della gestione della Società.

Art. 13

Le divergenze che dovessero eventualmente sorgere tra le due Parti Contraenti saranno sottoposte ad un collegio arbitrale composto di tre membri da nominarsi come segue:

a — uno dal Governo somalo;

b — uno dall'Alitalia;

c — il Presidente del Collegio di comune accordo dai due arbitri ed in caso di disaccordo dal Presidente della Corte Suprema della Repubblica Democratica Somala.

Il Collegio arbitrale si riunira' nella localita' scelta dal suo Presidente delibererà maggioranza assoluta.

Le decisioni del Collegio arbitrale saranno accettate come definitive dalle parti, e le spese sostenute saranno a carico della parte soccombente.

Art. 14

La presente Convenzione avrà la durata di 5 (cinque) anni a decorrere dal 1° Gennaio 1974 ed è rinnovabile, fatte salve le facoltà di cui al precedente articolo 12.

Fatto in due copie in lingua italiana, entrambe facenti ugualmente fede.

per l'Alitalia
Roma, lì 24 gennaio 1974
*(Dr. Umberto Nordio*
Amministratore Delegato
Alitalia — Linee Aeree Italiane)

per il Governo Somalo
Mogadiscio, lì 12 gennaio 1974
*(Ten. Col. Musa Rabile Got*
Segretario di Stato ai Trasporti
della Repubblica Democratica
Somala)

---

**SHARCI L. 19; Tr. 9 Febberayo 1975.**
**Oggolaasho Heeshiis dhexmaray Dawladda Soomaaliyeed iyi l'Alitalia**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Heeshiishkii dhexmaray Dawladda Soomaaliyeed iyo Alitalia in ay wada lahaadan Sharikadda (Somali Airlines) kaa oo ahaa 15kii Febbaraayo 1970 kuna soo baxay Xeer Guddoonshaha GSK lambarkiisuna yahay L. 37, taariikh. 21kii Febberaayo 1970 laguna faafiyey faafinta Rasmiga ah L. 4/2, taariikh. 26kii Febberaayo 1970;

ISAGOO AY LA NOQOTAY inloo baahan yahay in ay labada dhinac ay sameeystaan Heeshiis taageeraya sidii ay horay ugu wadi lahaayeen Shaqada Sharikadda ee ka dhexeeysa Dawladda Soomaaliyeed iyo l'Alitalia — Linee Aeree Italiane S.p.A., si ay Sharikaddasu u gaarto danaheeda.

ISAGOO TIXGELINAAYO In Heshiiskaa la gaaray 24kii Janaayo 1974 ee dhexmaray Dawladda Dimoqraadiga Somaaliya iyo l'Alitalia wuxuu taabagal ka dhigaaya Danaha Guud ee Dalka.

ISAGOO DHEGEYSTEY Talooyinkii Xoghayaha Wasaaradda Gaadiidka.

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Waxaa la go'yey in Heshiiskaanu uu taaba gal noqdo la maalintii la kala saxiixday laga bilaabo.

Waxaa la oggolaaday Heshiiskii dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqradiga Somaaliyeed iyo Alitalia — Linee Aeree Italiane S.p.A. taariikhkiisuna ahayd 24kii Janaayo 1974, kaasoo saldhig u ahaa Xeerkii soo baxay 15kii Febberaayo 1970, kuna soo baxay Xeerkii Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka, lambarkiisuna ahaa L. 37, taariikhdiisuna ahayd 21kii Febbaraayo 1970.

Qodobka 2aad

Heshiiskaan cusub waa mid kama haraan ah Xeerkan, waana in lagu soo saraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9 Febbaraayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

# BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 21 Jannayo 1975, L. 28
Magacaabid Guddoomiye Gobolka Hiiraan.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka todobaad ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 soona baxay siddeedii Juunyo 1972kii;

ASAGOO TIXGELIYEY Tilmaantii Xoghayaha Dowladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiye Gobolka Hiiraan.

WUXUU GOOYEY

Qodob. 1aad.

In Gaashaanle Dhexe Farax Maxamuud Soleymaan uu Guddoomiye ka noqdo Gobolka Hiiraan.

Qodob. 2aad

Go'aankani wuxuu dhaqan gelayaa si degdeg ah, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 21 Jannayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*Jaalle S.G. Jaamac Maxamed Qaalib*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 21 Jannayo 1975, L. 29.**
**Magacaabid Guddoomiyaha Gobolka Togdheer.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka todobaad ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 soona baxay sideedii Juunyo 1972kii;

ASAGOO TIXGELIYEY Tilmaantii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiye Gobolka Togdheer.

WUXUU GOOYEY

Qodob. 1aad

In G.le Dhexe Jaamac Xirsi Cumar uu Guddoomiye ka noqdo Gobolka Togdheer.

Qodob. 2aad

Go'aankani wuxuu u dhaqan geleyaa si degdeg ah, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Jannayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*Jaalle S. G. Jaamac Maxamed Qaalib*

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**Tr. 21 Jannayo 1975, L. 30.**
**Dallacsiin la siiyey Gaashaanle Dhexe**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5naad (lambarka 4aad ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska lana soo saaray 23kii Disembar 1972, kuna lambarsan 2;

ASAGOO TIXGELIYEY Shaqadiisa wanaagsan iyo muteysi awgeed (merito eccezionale);

ASAGOO ARKAY Warqaddii lambarkeedu ahayd XGM/GSK-13-08 taariikhdeeduna ahayd 6.1.1975 ee Madaxtooyada GSK kuna saabsaneyd in la dallacsiiyo Gaashaanle Dhexe Cabdalla Xaaji Axmed;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha uu ku soo jeediyey warqadda taariikhdeedu tahay 5.12.1974.

WUXUU XEERAY

Qodob. 1aad

In Gaashaanle Dhexe Cabdalla Xaaji Axmed ee ka tirsan Ciidanka Boliiska la dallacsiiyey lana gaarsiiyey darajada ah Gaashaanle Sare, marka laga billaabo 6.1.1975, kuna hirgeleysa xagga sharciga iyo dhaqaalahaba.

Qodob. 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Jannayo 1975.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha

*Jaalle S. G. Jaamac Maxamed Qaalib*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**
Tr. 27 Agoosto 1974, L. 31.
Siismo dhul Dawladeed la siiyay Jaalle Sheekh Xasan Hamuud Cabdi — Baydhabo.

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 50 taariikhdeeduna yahay 26 Jen. 1964;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Sheekh Xasan Hamud Cabdi, taariikhdeeduna ahayd 1.10.1975, uu ku weydiisanayay dhul dhismo Dowladeed kuna yaal Baydhabo;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulkaa ee lagu dhejiyay Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna daabacay xaashida rasmiga ah ee Dowladda lamb. 11 taariikhdeeduna ahayd 1 Nov. 1959;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii guddiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha, soona gudubtay taariikhduna ahayd 6 Jennaio 1960.

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 19 taariikhdeeduna tahay 12 Jen. 1960, in Jaalle Sheekh Xasan Hamud Cabdi, uu dhibay Xafiiska Canshuurta Dadban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 525,60 oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay 1015085 taariikhdeeduna ahayd 5 Feb. 1960 in ninka kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiya mq. 525,60 kuna yaal

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

## AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Xasan Hamuud Cabdi la siiyay dhul Dawladeed ee ku fadhiya mq. 525,60 kuna yaal Baydhabo.

Muqdisho, 27 Agoosto 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

*VISTO E REGISTRATO*
*Reg. n. 1 Foglio n. 33*
*Mogadiscio, lì 5 Set. 1974*

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA
Tr. 1 Febbaraayo 1975, L. 32.
Xabsi Cusub.

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKUU ARKAY Qodobka 2aad ee Sharciga Xabsiyada, Lam. 7 ee 30kii Disembar 1971;

MARKUU DHAGEYSTAY Taliyaha Ciidanka Asluubta;

MARKAY U MUUQATAY Baahida loo qabo Xabsi.

WUXUU KU DHAWAAQAYAA

Qodob. 1aad

Marka laga bilaabo maalinta uu Xeerkani dhaqan galo in «Xeradii hore ee Curyaamiinta» ee Warsheekh ay noqonayso meel Xabsi ah oo lagu hayn karo Maxaabiista xukuman, xarigoodu inkastaba ha ahaadee, iyo kuwa aan xukunaynba.

Qodob. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geli doonaa marka Xaashida Rasmiga ah ee Dawladda lagu qoro.

Muqdisho, 1 Febbaraayo 1975.

*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sheekh Xuseen*

Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka
iyo Arrimaha Diinta

# BOGGA SADDEXAAD

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Xasan Caydiid Warsame.

Markan arkay Qod. 69 D.L. 1969 n. 2. Waxaa cad dhumista Jegga wareega L. 12007 Shs. 2.300 (labakuniyosadexboqol) shilin ee Bankiga Keydka iyo Amaahda, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga, aan kor ku soo sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabato markii lagu dhigo faafinta Rasmiga (B.U.) haddaan la heiin cid sheegta waana in hacanta laga saaro Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay ama qof sita wakaalad Sharci ah ayadoo la sugaayo 15 beri.

Muqdisho, 1 Febberaayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(21) *Jaalle Yasiin Shire Faarax*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA HIIRAAN

Markii uu arkay arjiga L. 1/75, taariikh 5.1.1975 ee ku saabsanaa in Aadan Cabdi Jabiin uu ka lumay Buuggii lacagta geydsiga (Libretto Bancario) L. 1466 Shs. 800 (sideedboqol).

Markii uu arkay warqadii ka soo baxday Bangiga Keydsiga iyo Amaanda laanta Beledweyne ee lagu sugay in buugga aan kor ku soo xusnay uu lahaa Aadan Cabdi Jabiin.

Wuxuu caddeynayaa lumidii buugaas L. 1466, Shs. 800 (Sideedboqol).

Markuu arkay Qodobka 69 D.L. 9.9.65 n. 2,wuxuu amrayaa in loo samayo buugaas bedelkiisi Aadan Cabdi Jabiin muddo 30 (soddon) casho ka bilaabato maalinta lagu faafiyo (Bollettino Ufficiale). Buugaas waa in gacanta laga saaraa Aadan Cabdi Jabiin, ama qofkii ka haysta wakaalad.

Beledweyne, 1 Febberaayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(22) *Dr. Aadan Cabdulqaadir*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

Busad Axmed Muxumed waxay hor timid Maxkamadda ayada oo-oo ah qofka haysatay Jeegga wareega lambarkiisu yahay 12093 kuna qorna Axmed Cali Ducaale kuna tiil lacag dhan So. Sh. 4.000 (afar kun oo Shilin) waxayna i tustay warqaddii Maamulaha Bankiga Kaydka iyo Amaahda.

Waxaan halkan bixinaya Amarka aniga oo cuskanaya qodobka 27 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 9kii Sebtember 1965, Jeega Wareega ee lambarkiisu yahay 12093 in la tirtiro, waxaana Amar ku bixinaya:

a) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

b) Lacagta ah So. Sh. 4.000 in Bankigu u celiyo Busad Axmed Muxumed 30 casho dabadeed marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Hargeysa, 11 Febberayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(23) *Xasan Xaaji Yuusuf*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Axmed Yuusuf Faarax, markaan arkay Qod. 69 D.L. 1969 n. 2.

Waxaa cad dhumista Jegga wareega L. 11997, kuna qorantahay Sh. So. 2.000 (labakun) shilin ee Bankiga Keydsiga iyo Amaahda, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jegga, aan kor ku soo sheegay muddo 15 beri oo ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga (B.U.) haddaan la helin cid sheegata waana in gacanta laga saara Jaallaha aan magaciisu kor ku qoran yahay ama qof sida wakaalad sharci ah ayadoo la sugayo 15 beri.

Muqdisho, 23 Febberayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(24) *Dr. Yasiin Shire Faarax*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Waxaan arkay dacwadan. Markaan arkay waxay ku saabsantahay iyo ogeysiiskii Bankiga Keydka iyo Amaahda waxaan ogaaday iney tahay shaqadeyda.

Arkay qodobka 69 D.L. 9.9.65 n. 2, waxaan caddeynayaa dhumidii buugga lacagta (ammortamento libretto) n. D.R. 1307 Shs. 701,82. Waxaan amrayaa in loo sameeyo buugga ninka la yiraahdo Saalax Cabdalla Mubaarak, muddo 30 beri ah, laga bilaabo maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga, haddaan qof kale oo ku sheeganayaa usan jirin. Waxaan kale codsanayaa in Buugga gacanta laga laga saaro Jaallaha magaciisa kor ku qoran yahay, ama qof kale oo ka sita wakaalad sharci ah.

Muqdisho, 1 Maarso 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(25) *Dr. Yasiin Shire Faarax*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Markaan arkay weydiintii Cali Haybe Waceys. Markaan arkay Qod. 69 D.L. 1969 n. 2.

Waxaa cad dhumista Jeegga Wareega L. 003404, kuna qorantahay Sh. So. 23.300 (saddex iyo labaatankun iyo saddexboqol) shilin ee Bankiga Ganacsiga Ummadda, waxaan idiinka amreynaa in loo cusbooneysiiyo mar labaad Jeegga aan kor ku soo sheegnay muddo 15 beri oo ka bilaabata markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga, haddaan la helin cid sheegata, waana in gacanta laga saaro Jaalle Cali Haybe Waceys, ama qof sita wakaalad sharci ah ayadoo lasugayo 15 beri.

Muqdisho, 2 Marso 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda

(26) *Dr. Yasiin Shire Faarax*

---